



UJEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay 02/08/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXISADA 1AAD:- HALIMA YASSIN ADAN, Hooyo: Faadumo Cabdulle Xasan, Somali ah, Ku Dhalatay: Wajir, Sanadkii: 01/01/1983, Sidata: Kenyan passport, Lr. CK14880

WAKAALAD BIXIYAHA 2AAD:- ABDIRASHID YASIN ADAN, Hooyo: Maryan Hassan Diiriye, Somali ah, Ku Dhashay: Cabudwaaq, Sanadkii: 25/01/1986, Sita: Somali Passport, Lr. P01036636

LA WAKIISHE:- ABDIKADIR JAMA ADAN, Ina Faadumo Muuse Aadan, Somali ah, Ku Dhashay: Garbahaareey, Sanadkii: 01/01/1965, Sita: Somali Passport, Lr. P01479894

B- Anaga oo kala ah **1- HALIMA YASSIN ADAN 2- ABDIRASHID YASIN ADAN**, Waxaan qoraalkaan si wadajir ah ku Cadaynaynaa Anaga oo Maskaxda iyo Caqligaba Ka fiyow Cid Naqasabtayna aysan Jirin in aan Wakiilanay Adeerkeen **ABDIKADIR JAMA ADAN** una wakiilanay qaybta dhaxalka ah ee aan ku leenahay dhamaan hantida guurtada iyo maguurtada isugu jirta ee uu ka geeriyooday Aabaheyn Marxuum **YAASIIN AADAN BOOTAN**, kuna Qoran Magaciisa Mood & Noolba leh, kuna taala Gobolka Banaadir & Gobolada kale ee dalka, sida guri, dhul banaan, goof, beer, Gaadiid, sheer shirkadeed, I.W.M.

hadaba waxaan si buuxda ugu wakiilanay in uu Xafidi karo, dayactiri karo, kireeyn karo, Xanaaneyn karo, ilaalin karo, inoona raadin karo wax alaale wixii Dukuminti Milkiyadeed ee naga maqan, inoona dalbi karo Duckumiinti duplicate ah, u Doodi karo, Qareen inoo qaban karo haddii loo baahdo, inoogana doodi karo maxkamadaha dalka darajadooda kala duwan, naguna Matali karo dhan kasta la inooga baahdo, inoona sameen karo waraaqaha dhaxalkoobka ah, isla markaasna inoo saxiixi karo kaalinteenaa ku aadan dhamaan waraaqaha la inooga baahdo suul iyo saxiixba sida waraaqaha dhaxalkoobka ah, una idman yahay in uu si buuxda u Maamulo Hantidaas kasoo jeeda marxuum **YAASIIN AADAN BOOTAN** lehna tilmaamaha kor kusoo sheegnay.

Waxaan mar kale sii caddeynaynaa in **ABDIKADIR JAMA ADAN** awoodaas aan siinay uu u madax banaan yahay oo anaga Qeyb dhaxaleedkaas aan soo sheegnay ka macaamilideeda wax na looga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **ABDIKADIR JAMA ADAN**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiiyeen **1- HALIMA YASSIN ADAN 2- ABDIRASHID YASIN ADAN**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA 1-AAD

HALIMA YASSIN ADAN

Halima

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA 2-AAD

ABDIRASHID YASIN ADAN

Abdirashid

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

ABDIKADIR JAMA ADAN

Abdikadir

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- MOHAMED IBRAHIM ABBAS

Mohamed Ibrahim

2- ABDIWELI MOHAMUD MOHAMED

Abdiweli

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1717/T.P.N/25, Tr. 02/08/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- HALIMA YASSIN ADAN, 2- ABDIRASHID YASIN ADAN** Ahna (Wakaalad Bixiyayaal), **3- ABDIKADIR JAMA ADAN** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxda iyo Caqligaba Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Dhowaan Goud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"






FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 27/08/2025

Aniga oo ah **Cabaas C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/kariin Jaamac Aadan** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 1717/T.P.N/25**, **Tr. 02/08/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	C/kariin Jaamac Aadan
Nooca	Wakaalad Guud
Loo Wakiishay	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixiyeyaasha Xaliimo Yaasiin Aadan C/rashiid Yaasiin Aadan
Taariikhda Wakaalada	02/08/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **C/kariin Jaamac Aadan**, Leh
Tel No. 061 540 0034, Degan **Muqdisho**
Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska
Nootaayaha Tayo Dukumiintiga Wakaalada faah
faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Cabaas C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/kariin Jaamac Aadan